



WAXABARASHA GAARKA AH BARNAAMIJKA (IEP)HORMARINTA

Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) waa dukumiinti kaasoo qeexaya tayada ilmaha iyo taageerada iyo Adeegyada uu/ay helayso iyo yoolalka sanadka. Waalidiinta iyo qoysaska waxay door muhiim ah kadheelaan hormarinta IEP iyo go'aan qaadashada.

waxbixinada dib u eegisyada lagu sameeyay hawsha waxbarashada gaarka ah ayaa loo adeegsadaa qeexida tayada ardayga iyo caqabadaha. IEP waxay xaqiijisaa fursadaha waxbarashada saxda ah, hoyga, la qabsiyada, adeegyada gaarka ah iyo taageerooyinka. Dhamaan kuwaan waxaa loogu talagalay si loo buxsho baahiyaha gaarka ah ee ardayga tasoo loo eegaayo curyaanimadiisa.

Heerarka waxqabadka joogista (PLP)

IEP ga waxay wax kuqeexaysaa luuqad waalidiinta iyo shaqaalaha ay fahmi karaan, halkaasoo ardayga uu shaqaynaayo si daa darteed sanad kadib waalidka iyo aqoonyahanada kaleba waxay ogaan karaan hormarka lasameeyay.

- **Habdhaqanka Dareenka:** bulshanimi, sharaftiisa xiriirada iyo cabsiyaha.
- **Jir ahaan:** Caafimaad, allerjiyada, xirfadaha muuqda, dhaqdhaqaaqa iyo daawooyinka:
- **Aqoonta:** Dhagaysiga, hadalka, aqrinta, qorista, barashada xisaabta, farshaxanka, muusikada, tignoolajiyada, sayniska, guriga iyo shaqada.
- **Baahiyaha maamulida:** gaadiidka, bareegyada, deegaanka, tignoolajiyada, daawooyinka iyo hoyga.

Yoolalka sanadlaha ah ee Laqiyaasi karo

IEP waxay diirada saaraysaa yoolalka aqoonta iyo shaqada labadaba. Kuwaan waxaa laga sameeyaa war qoraaleedyada PLP. Arday kasta wuu kaduwanaan doonaa.

Hawlaha kumeelgaarka ah

Qaybtaan IEP da waxay dulmaraysaa wadada nolosha ardayga dugsiga sare kadib. Waxaa kamida taageerooyinka iyo adeegyada taasoo hubinaysa in ardayga uu diyaar uyahay dhinacyada nolooshoo dhan - noolaado, wax barto, shaqeeyo uuna ciyaaro.

Meelaynta

Baahiyaha lagu sheegay qoraalada iyo adeegyada PLP waxay go'aamiyaan halka barnaamijka uu ahaanaayo. Waxaa jira noocyo kala duwan oo meelaynta ah, meelkasta lagasoo bilaabo meelaha waxbarashada guud ilaa fasalada yaryar ee bixiya taageero waxbarasho.



Yoolalka IEP yada waxaa looqoray in sanad lagu sameeyo waana in laqiyaasi karo.

Yoolalka waqtiga fog ee noolaanshaha, shaqaynta iyo barashada sida qof qaan gaar ah ayaa lahormariyaa laga bilaabo da'da 15.

Qorshayaasha Faragelinta habdhaqanka ayaa laga keenaa Qiimaynada Habdhaqanka fulinta si wax looga qabto habdhaqanada caqabada leh.

Gudiga Waxbarashada Gaarka ah waa inay dib u eegaan IEP uguyaraan halmar sanadkii (Dib u eegista sanadlaha ah) si loo fiirsho hadii yoolalka lagaaray iyo hadii hormar lasameeyay. Ilmaha waa in si rasmi ah dib loogu eegaa ugu yaraan sadexdii sanaba mar; si kasta hanoqotee barnaamijka waxaa dib loo egi karaa xili kasta.

*Tixraacyada iyo macluumaadka uu bixiyay;
-www.p12.nysed.gov (Xeerarka Gudoomiyaha
Waxbarashada - Qaybaha 200 iyo 201)
Visit parentnetworkwny.org for more info.*